

Tallaalka koronaha ee Oulu

Tallaalku waa lacag la'aan. Tallaalka waxaa helaya dhammaan dadka gaaray 16 sano iyo wixii ka weyn da`daas ee deggan Finland ama dadka muddada dheer joogay Finland. Tallaalka koronaha waa 2 goor oo tallaalka ah.

Tallaalku ma aha qasab, laakiin waa lagugula talinayaa in aad qaadatid. Tallaalka koronaha waxa uu kaa difaacayaa cudurada halista ah, marka lagu tallaalkana waxaad ka ilaalinaysaa ehelkaaga. Marka ay dad badan qaataan tallaalka, waxaa suurtagal ah in si dhaqso ah bulshada la isku dhax fasaxo.

Haddii uu kugu dhaco korona, waxaad qabsataa ballanta tallaalka ugu yaraan bil kadib markuu kugu dhacay korona.

Goormaan helayaa tallaalka?

Oulu waxa ay ku dhaqmayso sharciyada ay soo saareen dowladda Finland ee habka tallaalka. Tallaalka waxa uu u soconayaa habka kala weynida da`da, waayeelka kaddib sida loo kala weyn yahay. Dedejinta tallaalka waxa ay ku xiran tahay hadba cadadka tallaalka ee ay Oulu hesho.

- Hadda waxaa socoto tallaalka dadka halista ku sugan ee 16 jirada iyo wixii ka weyn.
- Hadda waxaa socoto tallaalka dadka dhashay 1996 dii iyo wixii ka weyn.

Hoos waxaa ku yaal qiyaasta goorta dadka da'ahaan kala duwan ay qaadan doonaan tallaalka Oulu. Jadwalka wuu isbaddali karaa.

- Wiigga 26 aad: Dadka dhashay 2001 iyo wixii ka weyn
- Wiigga 27 aad: Dadka gaaray 16 sano iyo wixii ka weyn

Goobta tallaalka:

Ouluhalli, Ouluhallintie 20. Tallaalka dartii waa in aad ballan sii qabsataa.

Qabsashada ballanta

Ka qabso ballan [adeegga daryeelka fayadhoorka ballan qabsashada internetka](#) (waxa ay u baahan tahay is xaqiijin) (luuqadaha waa finish, iswidhish, ingiriis) ama taleefan tal. 08 558 41415 isniinta–khamiista saacadda 8–16, jimcaha saacadda 8–15.

Haddii aad taleefan ku ballansato, u reeb codsi ah in dib lagu soo waco. Waa inaad sugin khadka ama aad wacdid lambarka dhowr jeer. Haddaad qof kale u qabaneysid ballan, waxaa loogu qaban karaa taleefan oo kaliya.

Hagitaanka ku socda dadka tallaalka u soo socda

- Imo goobta tallaalka adoo caafimaad qaba, waana in aad xiran tahay af duub ama maaskaro.
- Imo goobta ballanta 5–10 daqiiqo ka hor xilliga ballanta, si aan cariiri u noqon goobta.
- Soo xiro gacma gaab ama dhar fidsan oo kor loojiidi karo.
- Ku talagal in aad caddaysaa qofkaad tahay tusaale kaarka aqoonsiga ama laysinka wadidda.
- Ku talagal in tallaalka kadib aad goobta fadhidaa 15 daqiiqo si loo ogaado xaaladdaada.
- Tallaalku waa laba tallaalka, tallaalka labaad waxaa ballantiisa lagu siinayaa marka lagu tallaalkayo.

Haddii aanad awoodayn inaad ku adeegatto luqadda finishka ama ingiriiska waxaad heli kartaa caawimaad aad ka helayso la talinta luuqadaha badan ee

somali

magaalada Oulu . La-talinta luuqadaha badan ayaa sidoo kale bixisa macluumaad ku saabsan kooxaha halista u ah cudurka caabuqa korona, tallaalada, shahaadada tallaalka iyo macluumaad ku saabsan dhibaatooyinka ka dhalan kara tallaallada.